

**D.P.R. Lamb. 164 ee 16 Luulyo 1962**

**DHISMAHA GUDDIGA AMMANKA EE QARANKA**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

KADIB markii la arkay qod. 85 ee Dastuurka;

KADIB makii laga baaran degey baahida loo qabo in la dhiso hey'adda Guddiga Ammanka ee Qaranka;

IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta Golaha Wasiiradaha;

IYADOO la tixgeliyey soo jeedinta Rai'suul Wasaaraha.

**WAXAA LA AMRAY:**

**Qod. 1**

Waxaa la ag dhisay Guddoonka Golaha Wasiiradaha agtooda Guddiga Ammanka Qaranka.

Guddigaasi waa xubinta ugu sareeysa ee lagala tashado nabadgelyada qaranka iyo midnimada dalka.

Guddiga Ammanka Qaranka wuxuu mas'uul ugaga yahay Dowladda fulinta awooda lagu xilsaaray dekreetadana.

**Qod. 2**

Guddiga Ammanka Qaranka wuxuu u xilsaaran yahay:

- a) Kormeerka nabadgelyada guud ahaaneed ee dalka;
- b) In uu qorsheeyo wax kasto oo loogaga horteegego karo aafuoyinka qalqal gelin karo nidaamka guud, ama ammanka qaranka ama habka loogaga hortegi lahaa isku dayiidda kala goynta midnimada dalka;
- c) Soo jeedinta, haddii loo baahdo fursadaha iyo falgallo ku xadeysan Dastuurkade, shuruucda iyo xeerarka oo loogaga horteggi karo qatarta lid ku ah ammanka qaranka iyo degganashaha dastuurka;
- d) Soo jeedinta tilmaamo ama taaloyinka ku haboon xubnaha dowliga ah si ay u hirgeliyaan arrimaha lagu qoray faqrada sare ku xusan a), b) iyo c).

Guddiga Ammanka Qaranku wuxuu u dhigmaa xubin lagala tashto marxaladaha la xiriira ammanka ee dowladdu ay u soo bandhigto.

**Qod. 3**

Guddiga Ammanka Qaranka wuxuu ka kooban yahay:

- a) Rai'sul Wasaaraha oo madax ka ah;
- b) Wasiika Arrimaha Dibedda oo xubin ka ah;
- c) Wasiirka Arrimaha Gudaha, xubin;
- d) Wasiirka Difaaca, xubin;
- e) Abaandulaha Ciidanka Qaranka, xubin;
- f) Abaandulaha Ciidanka Booliska, xubin.

Haddii uu Rai'sul Wasaaraha uu soo xaadiri waayo, waxaa madax u noqon doono sida lagu tilmaama qodobka 7 ee isla sharcigaan.

#### **Qod. 4**

Xoghayaha Guddiga Ammanka Qaranka waxaa noqon doono sarkaal dowli ama sarkaal oo Rai'sul Wasaarahu uu magacaabay sida ku tilmaaman xeer nidaamiyaha qod. 7 ee isla sharcigaan.

#### **Qod. 5**

Markii loo bahdo, waxaa looga yeeri kara shirarka Guddiga Ammanka Qaranka Wasiirada aan ka mid ahayn kuwa lagu tilmaamay qod. 3 kuwaas oo lahayn coddeyn, ama waxaa ka soo qeyb geli kara xubnaha kale ee dowladda ama militariga. Xubnaha dowliga ah iyo kuwa madaniga ama militariga ah, haddii loo bahdo waxaa loo xilsaari kara howlaha la xiriira ammanka kuwaas lagu xeendabay xeer nidaamka sida oo tilmaamay qod. 7.

Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu weydiiyo xubnaha howlahaasi iska leh iyo hey'adaha dowliga macluumaad ama caddeynmo la xiriira shaqadooda iyadoo laga codsan doono in ay keenaan nuqul ama qeybo ka mid ah qorallada iyo dukumentiga loo baahan yahay.

#### **Qod. 6**

Guddiga Ammanka waxay ugu yaraan kulmi doonaan si caadiga ah bishiiba hal mar.

Waxaase Rai'sul Wasaarahu isugu yeeri kara kulan haddii ay baahi timaado Si uu ansax u noqdo kal fadhigga Guddiga, waa in kala bar iyo hal dheeri xubnahiisa ay soo xaadiraan. Go'aanka hela codadka ugu badan ayaa la raaci doono haddii ay barbar noqoto, Guddomiyaha ayaa codkiisa ku kala saari doono.

#### **Qod. 7**

Si uu howlahiisi u guto, Guddiga Ammanka Qaranka wuxuu yeelan doonaa xeer hoosaad nidaamin doono howlahiisa.

#### **Qod. 8**

Dekreeto- sharcigaani wuxuu hirgali doona maalinta ku xigta maalintii lagu daabacay Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho, 16 Luulyo 1962.

**Aden Abdulla Osman**

Ra'isul Wasaaraha  
**Abdirashid Ali Shermarke**

Diwaan no 1, boogga lamb. 230  
Muqdisho 25 Luulyo 1962  
Xisaabiyaha Guud: **Ahmed Dahir**

